

JAMHUURIYADDA		SOMALILAND
FAAFINTA RASMIGA AH		
SOMALILAND REPUBLIC OFFICIAL GAZETTE	النشرة الرسمية لجمهورية صوماليلاند	
XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL, HARGEYSA <i>E-mail: Faafintagaryaqaanka@gmail.com</i>		
Sanadka: 6aad	Cadadka: 10aad ee October	Taariikh: 04/11/2017
QIIMAHA CADADKA: SL. Sh.		
RUKUNKA (Subscription):		
<i>QIIMAHA FAAFINTA AAN DAWLIGA AHAYN ee Qaybta Shanaad: Sadarkii Boggii kastaaba SL. Sh.</i>		

TUSMADA CADADKA

<u>QAYBTA KOWAAD:</u> XEERARKA BAARLAMAANKA, HESHIISYADA CAALAMIGA AH IYO MIISAANIYADDA QARANKA:	
1)	SOOMA BIXIN
<u>QAYBTA LABAAD:</u> XEER MADAXWEYNE:	
2)	<u>WAREEGTO MADAXWEYNE:</u> 451 Awoodaha Baanka Dhexe ee Jamhuuriyadda Somaliland
3)	<u>XEER MADAXWEYNE</u> Lr: 0864/102017 453 Magacaabid
4)	<u>XEER MADAXWEYNE</u> Lr: 0865/102017 454 Magacaabid
5)	<u>XEER MADAXWEYNE</u> Lr: 0866/102017 456 Magacaabid
6)	<u>XEER MADAXWEYNE</u> Lr: 0868/092017 457 Magacaabid
7)	<u>XEER MADAXWEYNE</u> 458 Xil Ka Qaadis
8)	<u>XEER MADAXWEYNE</u> Lr: 0869/102017

Beddel	459
9) <u>XEER MADAXWEYNE</u> Lr: 0870/102017 Magacaabid	460
<u>QAYBTA SADEXAAD:</u> XEER NIDAAMIYAYAASHA WASAARADAHA, XEERARKA GOLAYAASHA DEEGAANKA, NATIJOOYINKA DOORASHOOYINKA & BARNAAMIJYADA DAWLADA:	
10) <u>Wasaarada Cadaaladda JSL</u> Fulin Go'aan kasoo Baxay Gudiga Cadaaladda JSL	462
<u>QAYBTA AFRAAD:</u> GO'AANADA MAAMUL & QARAARADA:	
11) SOOMA BIXIN	
<u>QAYBTA SHANAAD:</u> AMARADA, OGEYSIISYADA & QANDARAASYADA DOWLADA:	
12) Diiwaan Gelin Shirikada Kulmiye Sanjab Business Enterprise <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	466
13) Diiwaan Gelin Shirikada Iftin Pharmaceutical Company. <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	467
14) Diiwaan Gelin Shirikada Sun Product PVT <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	468
15) Diiwaan Gelin Yasser Addawla <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	470
16) Diiwaan Gelin Shirikada Golden Star Resource Company LTD <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	471
17) Diiwaan Gelin Shirikada Smart General Trading <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	473
18) Diiwaan Gelin Shirikada Sun Light Logistics & Procurement <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	474
19) Diiwaan Gelin Shirikada Goodir General Trading <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	476

QAYBTA LABAAD:

XEER MADAXWEYNE:

REPUBLIC OF  SOMALILAND



THE PRESIDENT

JSL/M/WM/222-5077/102017

DATE...03/10/17

Ku: Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga iyo Maalgashiga Caalamiga ah Hargeysa
Dg: Guddoomiyaha Baanka Dhexe ee Jamhuuriyadda Somaliland Hargeysa
Dg: Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka Hargeysa
Dg: Rugta Ganacsiga ee Jamhuuriyadda Somaliland Hargeysa
Dg: Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda Hargeysa

**Ujeeddo: Wareegto Madaxweyne; Awoodaha Baanka Dhexe ee
Jamhuuriyadda Somaliland**

Mudane Wasiir,

Markuu Arkay: Qodobka 90aad Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Qodobka 13aad ee Datuurka
Jamhuuriyadda Somaliland oo
dhigaya in qaranku yeelanayo Baan-
dhexe oo hoggaamiya siyaasadda iyo
ilaalinta lacagta Dalka;

Markuu Yaqiinsaday: Ahmiyadda uu Baanka Dhexe
ee Jamhuuriyadda Somaliland u
leeyahay taageeridda siyaasadaha
guud ee dhaqaalaha dalka iyo

kordhinta koboca dhaqaale oo joogta ah;

Markuu Tix-geliyey: Qoraalka Baanka Dhexe ee Jamhuuriyadda Somaliland ee ujeeddadiisu ahayd Awoodaha Ruqsad Siinta Hay'adaha maaliyadeed;

Markuu Arkay: Ujeeddooyinka, Waajibaadka Aasaasiga iyo Mas'uuliyadaha gaar ah ee Baanka Dhexe, sida ay dhigayaan Qodobada 4aad iyo 69aad ee Xeerka Baanka Dhexe Xeer Lr.54/2012;

Markuu Darsay: Muhiimadda ay leedahay in la ixtiraamo madax-bannaanida Baanka Dhexe marka uu gudanayo waajibaadkiisa si sharciga waafaqsan, isla markaana ku taagan ujeeddooyinkii loo aasaasay sida uu dhigayo Qodobka 5, Faqradiisa 4aad ee Xeerka Baanka Dhexe;

Markuu Arkay: In ay waajib tahay in la dhaqan geliyo Xeerka Baanka Dhexe, gaar ahaan Nidaamka Maamulka Ruqsadaha iyo Ruqad-bixinta Banaanka iyo Hay'adaha maaliyadeed sida Xawaaladaha Caymiska, Maalgelinta yaryar, adeeg-bixiyeyaasha Maaliyadeed IWM (Ramittances, Insurances, Microfinance and Mobile Money Providers etc), si waafaqsan Qodobada 83aad, 91aad iyo 98aad ee Xeerka Baanka Dhexe iyo hababka iyo nidaamyada lagu cayimay Xeer Nidaamiyaha khuseeya;

Markuu Arkay:

In ay muhiim tahay in si buuxda loo fuliyo awooda Baanka Dhexe ee nidaaminta, kor-joogtaynta iyo heerarka qiimeynta (Regulation, supervision and prudential standards) ee adeeg bixiyeyaasha iyo hay'adaha maaliyadeed si waafaqsan Qodobada 90aad iyo 94aad ee Xeerka Baanka Dhexe;

Wuxuu Soo Saaray,

In nidaamka diiwaangalinta, ruqsad siinta, korjoogtayna iyo maamulida hay'adaha maaliyadeed uu qaranka uga masuul yahay Baanka Dhexe ee Jamhuuriyadda Somaliland, sidaa daradeedna ay waajib tahay in loo hoggaansamo, laguna ixtiraamo masuuliydaha uu qaranka uga masuulka yahay Baanka Dhexe.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-5158/102017

DATE....25/10/17

XEER MADAXWEYNE Lr: 0864/092017

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



- Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Fagradiisa 3aad, (r) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Tixgeliyey: Ahmiyadda Wakiillada Somaliland u fadhiya dalalka dibaddu u leedahay Dhismaha Qaranka;
- Markuu Arkay: In baahi loo qabo magacaabida jagada Wakiilka Jamhuuriyadda Somaliland u fadhiya Dalka Ireland;
- Markuu Ka Fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo;
- Markuu ku Qancay: In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;

Wuxuu go'aansaday

In Mudane, Cabdiraxmaan Maxamed Aadan Jaamac (Dheri), laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Wakiilka Jamhuuriyadda Somaliland u fadhiya Dalka Ireland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  **SOMALILAND**

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-5160/102017

DATE....25/10/17



Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad, ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu arkay: Qodobka 110aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland
- Markuu Tixgeliyey: Ahmiyadda ay Guddoomiyeyaasha Gobolladu u leedahay Dhismaha Qaranka;
- Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta jagada Guddoomiye ku-xigeenka Gobolka Sanaag ee Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Ka Fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo;
- Markuu ku Qancay: In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;

Wuxuu go'aansaday

In Mudane, Ismaaciil Cabdi Xasan (Fara-dheere), laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Guddoomiye ku-xigeenka Gobolka Sanaag ee Jamhuuriyadda Somalilandda.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  **SOMALILAND**

THE PRESIDENT



JSL/M/XERM/249-5164/102017

DATE...25/10/17

XEER MADAXWEYNE Lr: 0866/092017

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta
xubinta ka bannaan Guddida
Dib-u-habaynta Shuruucda;

Markuu Tixgeliyey: Ahmiyadda Guddiga Dib-u-
habaynta Shuruucda u leedahay
Dhismaha Qaranka;

Wuxuu go'aansaday

In Mudane, Cabdi-kariim Qaasim Wacays Daahir, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado xubin ka tirsan Guddiga Shuruucda Dib-u-habaynta Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  **SOMALILAND**

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-5168/102017

DATE...26/10/17

XEER MADAXWEYNE Lr: 0868/092017

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu arkay: Qodobka 110aad ee Dastuurka
Jamhuuriyada Somaliland

Markuu Tixgeliyey: Ahmiyadda ay
Guddoomiyeyaasha Gobolladu u
leedahay Dhismaha Qaranka;

Markuu Aqoonsaday: In baahi loo qabo buuxinta
jagada Guddoomiyaha Gobolka
Maroodi-jeex ee Jamhuuriyadda
Somaliland;

Markuu Ka Fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo
hufnaantiisa shaqo;

Markuu ku Qancay: In uu hanan karo xilkan loo
magacaabay;

Wuxuu go'aansaday

In Mudane, Boos Mire Maxamed, laga bilaabo taariikhda
maanta uu ahaado Guddoomiyaha Gobolka Maroodi-jeex ee
Jamhuuriyadda Somalilandda.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



REPUBLIC OF  SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/Q/249/1-5168/102017

DATE...26/10/17

Ku: Mudane, Mustafe Cabdi Ciise (Mustafe Shiine),
Guddoomiyihii Hore ee Gobolka Maroodi-jeex

Og: Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha

Ujeedo: Xil-ka Qaadis

Mudane,

Waxaan aad kuugu mahadinayaa muddadii aynu wada shaqaynaynay. Xilalka Qaranka ayey dabcigeed tahay in ay meerto noqoto oo kolba cid hanan karta loo dhiibo.

Sidaa darteed, waxaan gartay in aan kaa qaado xilka Guddoomiyaha Gobolka Maroodi-jeex ee Jamhuuriyada Somaliland.

Haddaba, waxaan kaa rajaynayaa in si niyad Sami ah aad ugu wareejiso xilka aad haysay Mudane, Boos Mire Maxamed, oo aan xilka Guddoomiyaha Gobolka Maroodi-jeex ee Jamhuuriyadda Somaliland u magacaabay.

Sidoo kale, waxaan Wasiirka Wasaarada Arrimaha Gudaha, oo ay waraaqdani ogaysiin ugu socoto, farayaa

in uu labada masuul u kala wareejiyo xilka Guddoomiyaha Gobolka Maroodi-jeex.



Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  **SOMALILAND**
THE PRESIDENT

JSL/M/WM/249-5176/102017

DATE....28/10/17

XEER MADAXWEYNE Lr: 0869/102017

Beddel

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: Qodobka 110aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Tixgeliyey: Ahmiyadda ay Guddoomiyayaasha Gobolladu u leeyihiin dhismaha Qaranka;
- Markuu aqoonsaday: In baahi loo qabo in isku beddel lagu sameeyo jagooyinkan hoos ku xusan;

Markuu Ku Fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo;

Markuu ku Qancay: In uu hanan xilalkan loo magacaabay;



Wuxuu go'aansaday in laga bilaabo taariikhda Xeerkan

In Mudane, Ibraahim X. Xasan Cali, uu ahaado Guddoomiyaha Gobolka Saraar ee Jamhuuriyadda Somaliland.

In Mudane, Cali Maxamed Faarax, uu ahaado Guddoomiyaha Gobolka Hawd ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  **SOMALILAND**
THE PRESIDENT

JSL/M/WM/249-5177/102017

DATE...28/10/17

XEER MADAXWEYNE Lr: 0870/102017

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Tixgeliyey: Ahmiyadda ay La-taliyeyaasha Madaxweynuhu u leeyihiin dhismaha Qaranka;

Markuu Arkay: In baahi loo qabo magacaabidda jagada La Taliyaha Madaxweynaha ee Arrimaha Dhaqanka iyo Is-dhexgalka Bulshada;

Markuu Ku Fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo;

Markuu ku Qancay: In uu hanan xilkan loo magacaabay;

Wuxuu go'aansaday

In Mudane, Maxamed Garaad Saleebaan Garaad Maxamed Garaad Maxamuud, laga bilaabo taariikhda manta uu ahaado La-taliyaha Madaxweynaha ee Arrimaha Dhaqanka iyo Is-dhexgalka Bulshada.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

QAYBTA SADDEXAAD:

**XEER NIDAAMIYAYAASHA WASAARADAAH, XEERARKA GOLAYAASHA
DEEGAANKA, NATIJJOOYINKA DOORASHOYINKA & BARNAMIJYADA
DAWLADA**



JAMHUURIYADDA SOMALILAND



REPUBLIC OF SOMALILAND

WASAARADDA CADAALADDA

MINISTRY OF JUSTICE

XAFIISKA WASIIRKA

MINISTER OFFICE

WC&AG/XW/G-02/416/17

11/10/2017

Ku: Radio Hargaysa,

=Hargaysa=

Ku: Telefishanka Qaranka SLNTV,

=Hargaysa=

Dg: Dhamaan Guddoomiyayaasha Maxkamadaha Racfaanka,

=Fadhidadooda=

Dg: Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka,

=Hargaysa=

Dg: Guddoomiyaha Maxkamada Sare JSL,

=Xaruuntiisa=

Dg: Garyaqaanka Guud ee Dawladda,

=Hargaysa=

UJ: FULIN GO'AANO KA SOO BAXAY GUDIGA CADAALADDA.

Wasaraadda Cadaaladda ee JSL, iyadoo cuskanaysa Qodobka **106aad** ee Dastuurka Qaranka Faqradiisa **1aad**, kaas oo qeexaya inay Wasaraadda Cadaaladdu u xil saarantahay Fulinta Go'aanada Guddiga Cadaaladda.

Sidaa darteed, waxaanu Halkan ku faafinaynaa Go'aanka Lambarkiiisu yahay **MS/GGC/G-3/03/2017** ee **11/10/2017**.

**GUDIGA CADAALADDU WAXAY GO'AAMIYEEN
QODOBADAN HOOS KU QORAN**

Qodobka 1^{aad}



MAGACAABIS KU XIGEEN XEER ILAALIYE GUUD

1. **Farxaan Mire Cismaan**, waxaa laga bedelay Xafiiska Xeer Ilaalinta G/Maroodi-Jeex, waxaana loo magacaabay Madaxa Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee G/Sool.
2. **Cabdi Ibraahim Aadam**, waxaa laga bedelay Xafiiska Xeer Ilaalinta G/Maroodi-jeex, waxaana loo magacaabay Madaxa Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud Gob/ Degmo Saraar Caynabo.

Qodobka 2^{aad}

BEDEL GARSOOREYAAL

1. **Jamaac Maxamed Ibraahim (Xaraaro)**, waxaa laga bedelay Garsoore Maxkamada Gobolka Maroodi-jeex, Waxaana loo bedelay Garsoore Maxkamadda Gobolka Saaxil.
2. **Axmed Yuusuf Cabdi (Ceeryaan)**, waxaa laga bedelay Garsoore Maxkamada Gobolka Maroodi-Jeex, waxaana loo badelay Garsoore Maxkamadda Gobolka Saaxil.

Qodobka 3^{aad}

ISU BEDEL KU XIGEENO XEER ILAALIYAAL GUUD.

1. **Axmed Cismaan Mire**, waxaa laga bedelay Madaxa Xafiiska Xeer Ilaalinta G/Togdheer Burco, waxaana loo bedelay Xarunta Xeer Ilaalinayaha Guud ee Qaranka.

2. **Jaamac Ducaale Siciid**, Waxaa laga bedelay Madaxa Xafiiska Xeer Ilaalinta G/ Saaxil, waxaana loo bedelay Madaxa Xafiiska Xeer Ilaalinta G/Togdheer Burco.
3. **Jamaal Jaamac Xaashi**, waxaa laga bedelay Madaxa Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud Gob/Degmo Gebilay, waxaana loo bedelay Madaxa Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee G/Saaxil.
4. **Xuseen Cali Khayre**, waxaa laga bedelay ku Xigeenka Xeer Ilaalinta Guud ee G/Togdheer, waxaana loo bedelay Madaxa Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Gob/Degmo Gebilay.
5. **C/kariin Xuseen Gardaf**, waxaa la bedelay Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee G/Maroodi-Jeex, waxaana loo bedelay Madaxa Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee G/Togdheer Burco.
6. **C/raxmaan Maxamed Maxamuud**, waxaa laga bedelay ku Xigeenka Xeer ilaalinta Guud ee G/Maroodi-Jeex, waxaana loo bedelay Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Gob/Degmo Gebilay gaar haan Wajaale.
7. **C/laahi Maxamed Cali (Fuumle)**, waxaa laga bedelay Madaxa Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee G/Sool, waxaana loo bedelay Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee G/Sanaag.

Qodobka 4^{aad}

SHAQO KA SAARID.

1. **Maxamed Maxamuud Xirsi (Guray)**, oo ahaa Garsoore Maxkamada Gob/Degmo Gebilay, waxaa laga saaray shaqadii Garsoorka.
2. **Maxamed Cumar Xasan**, oo ahaa Garsoore Maxkamada Gobolka Togdheer, waxaa laga saaray shaqadii Garsoore.

3. **Axmed Muxumed Xasan**, oo ahaa Garsoore Maxkamada Gobolka Togdheer, waxaa laga saaray shaqadii Garsoorka.
4. **Siciid Maxamed Obsiye**, oo ahaa Ku-xigeen Xeer Ilaaliye ee G/Saraar Waxaa laga saaray shaqadii Garsoorka.

Qodobka 5^{aad}

DIGNIIN.

1. **Idiris Maxamed Maxamuud**, oo ah Garsoore Maxkamada G/Maroodi-Jeex waxaa la siiyay Digniin kama dambays ah.

Qodobka 6^{aad}

AQBALAAD SHAQO KATAGIS.

1. **Cabdi Shakuur Cali Muxumed**, waxaa laga aqbalay Codsigii shaqo ka tagista.

ALLAA MAHAD LEH

Khadar Axmed Diiriye

WASIIRU DAWLAHA W/CADAALADDA.

QAYBTA SHANAAD:
AMARADA, OGEYSIISYADA & QANDARAASYADA DOWLADA:

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND



XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL

XIG/JSL/377/2017.

15/10/2017

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda magaceedu KULMIYE SANJAB BUSINESS ENTERPRISE.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland.

Markuu arkay: - Saxeexa saamiilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliye.y

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaan gashan yahay shirkada magaceedu yahay **KULMIYE SANJAB BUSINESS ENTERPRICE, Astaanteeduna tahay:** - (Magaca shirkada), shaqadeeduna tahay **Libinta Shidaalka (Fuel Distribution), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysaa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 15/09/2017.**

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Keer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.

JAMHUURIYADDA  **SOMALILAND**
XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL

XIG/JSL/378/2017.

15/10/2017

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Hargaysa

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, IFTIN PHARMACEUTICAL COMPANY.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland.

Markuu arkay: - Saxeexa saamiilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliye.y

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaan gashan tahay shirkada magaceedu yahay **IFTIN PHARMACEUTICAL COMPANY: - Astaanteeduna tahay:** - (Xarfaha IPCO ooku dhex jira bil cadceedka soo baxayso), shaqadeeduna tahay Soo Dejinta Dawooyinka iyo qalabka Caafimaadka (Import), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 15/10/2017

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.

JAMHUURIYADDA  **SOMALILAND**

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL

XIG/JSL/379/2017.

15/10/2017

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, SUN PRODUCT PVT LTD.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland.

Markuu arkay: - Saxeexa saamilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaan gashan yahay shirkada magaceedu yahay **SUN PRODUCT PVT LTD, Astaanteeduna tahy:** - (Cadceed arooryo oo ifaysa magaca shirkaduna ku hoosqoran yahay), shaqadeeduna tahay Soo Dejinta iyo Dhoofinta (Import and Export), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 15/10/2017.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.



JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL

XIG/JSL/381/2017.

18/10/2017

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Hargeysa.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, YASSER ADDAWLA, Oo ay ku cad yihiin xubnaha shirkadu, sida ku cad qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company law.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland. Saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay: - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka

11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer
Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.



Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaan gashan tahay shirkada magaceedu yahay **YASSER ADDAWLA, Astaanteeduna tahay** :- (YASSER ADDAWLA), shaqadeeduna tahay dhoofinta iyo Soo dejinta (Import and Export), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargaysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 18/10/2017

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL

JAMHUURIYADDA  **SOMALILAND**

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/382/2017.

18/10/2017

Hargeysa

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo: - Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.



Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, GOLDEN STAR RESOURCE COMPANY LTD, Oo ay ku cad yihiin xubnaha Shirkadu, sida ku cad qodobadka 11aad(2)(a) Somaliland company law.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay: - Saxeexa saamiilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay **GOLDEN STAR RESOURCE COMPANY LTD, Astaanteeduna tahay:** - Dube iyo Macdan), shaqadeeduna tahay Iibinta Macdanta (Mining dealer), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 18/10/2017

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka



JAMHUURIYADDA  **SOMALILAND**

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/383/2017.

18/10/2017

Hargeysa

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo: - Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeer Shirkadda Magaceedu yahay, SMART GENERAL TRADING.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka

Shirkadaha Xeer NO.25/2004
Company Act of Somaliland,

Markuu arkay: - Saxeexa saamiilaha Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo godobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay **SMART GENERAL TRADING, Astaanteeduna tahay:** - Goobo Magaca Shirkadu ku dhex jiro), shaqadeeduna tahay Dejinta Allaabooyinka (Import), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 18/10/2017

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA  **SOMALILAND**

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/386/2017.


22/10/2017

Hargeysa

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo: - Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.



Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeer Shirkadda Magaceedu yahay, SUN LIGHT LOGISTICS & PROCUREMENT.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay: - Saxeexa saamiilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay **SUN LIGHT LOGISTICS & PROCUREMENT, Astaanteeduna tahay:** - (Magaca Shirkada), shaqadeeduna tahay saad siinta (Logistics and Procurement), xarunteeduna tahay

Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 22/10/2017

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)



Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA  **SOMALILAND**

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/388/2017.

22/10/2017

Hargeysa

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo: - Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeer Shirkadda Magaceedu yahay, GOODIR GENERAL TRADING.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland.

Markuu arkay: - Saxeexa saamiilayda Shirkaddu ay saxeexey sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay **GOODIR GENERAL TRADING, Astaanteeduna tahay:** - (Magaca Shirkada), shaqadeeduna tahay soo Dejinta Allaabooyinka (Import), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 22/10/2017

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka